FAAFIN RASMIGA

الجريدة الرسمية

*JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA*

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 9aad Muqdisho 28 Feberaayo 1981 L. 3 R 2

*FAAFINTA BIL SOO BAXA* جريدة شهرية

*Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.*

**QIIMAHA** : waa 5 shilin lambar walba **RUKUNKA** : Sanalkii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda — dibedana waa Sh. So, 300, Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo Qiimaha qorotaanka F. R, halkii sadar iyo wàxii ka yàr wàà laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weeydiistaa Laanta Maamulkà Fàafintà Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuurahà ee Wàsàaràddà Làcagta.

KOOBNIIN

QAYBTA KOOWAAD

## SHARCI

SHARCI L. 12 ee 22 Jen. 1981, Kordhinta iyo kuwo cusub. Canshuuro horay loogu dhaqmayey Bogga 272

SHARCI L. 13 ee 22 Jen. 1981, Oggolaansho heshiis guud ee Iskaashiga Dhaqaalaha, Farsamada iyo Ganacsiga ee dhexmaray Dalalka Xubnaha ka ah Ururka Islaamka. » 281

SHARCI L. 13 ee 22 Jen. 1981, Meel marin Heshiis. » 282

L A W N. 13 on 22th Jen. 1981, Instrument of Ratification. » 283

SHARCI L. 14 ee 22 Jen. 1981, U rogid Sharci Xeerka Sharci Lamb. 35 ee 13 Dis. 1980 kuna saabsan dib u habeynta sicirka sonkorta. » 284

QAYBTA LABAAD

W. M.

Wakaaladda M. Qaranka

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IWM

WASAARADDA H. GUUD, 1.3.80, Naado Dhul J/le Hodan Axmed Cabdulle L. 144 » 286

WASAARADDA H. GUUD, 1.3.80, Naado Dhul J/le Bashiir Sheekh Cabdisalaam L. 145 » 287

WASAARADDA H. GUUD, 1.3.80, Naado Dhul J/le Cabdullaahi Xersi Cusmaan L. 146 » 288

WASAARADDA H. GUUD, 1.3.80, Naado Dhul J/le Xuseen Maxamed Aw Cali L. 147 » 289

WASAARADDA H. GUUD, 1.3.80, Naado Dhul J/le Maxamed Jaamac Yuusuf L. 168 » 290

WASAARADDA H. GUUD, 1.3.80, Naado Dhul J/le Yuusuf Cabdi Xersi L. 169 » 291

WASAARADDA H. GUUD, 1.3.80, Naado Dhul J/le Xasan Maxamed Nuur L.150 » 292

WASAARADDA H. GUUD, 1.3.80, Naado Dhul J/le Maxmuud Cabdi Xasan L. 151 » 293

WASAARADDA H. GUUD, 1.3.80, Naado Dhul J/le Maxamed Xasan Maxamed L. 152 » 294

WASAARADDA H. GUUD, 1.3.80, Naado Dhul J/le Yaasiin Cabdi Cali L. 153 » 295

WASAARADDA H. GUUD, 1.3.80, Naado Dhul J/le Culuma Muuse Aadan L.154 » 296

WASAARADDA H. GUUD, 1.3.80, Naado Dhul J/le Maxamed Cabdi Xersi L. 155 » 297

WASAARADDA H. GUUD, 1.3.80, Naado Dhul J/le Cusmaan Aadan Maxamed L. 156 » 298

WASAARADDA H. GUUD, 1.3.80, Naado Dhul J/le Nuur Maxamuud Cumar L. 157 » 299

WASAARADDA H. GUUD, 1.3.80, Naado Dhul J/le Shamis Faarax Jaamac L. 158 » 300

WASAARADDA H. GUUD, 29.3.80, Bed. Naado Dhul J/le Maxamed Ibraahim Cabdi L. 159 » 301

MAXKAMADDA G. SH/DHEXE, 29.3.80, Buug Keyd L. 1174/5 ku qoran J/le Xaawo Axmed Maxamuud. » 302

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 21.2.81, Lumid Buug Kayd L. 15601 ku qoran Cabdullaahi Cabdulqaadir Daahir L. 160/Bis » 303

OGEYSIIS SHIR SAAMILEY, Warshadda Saabuunta Bayl. » 304

OGEYSIIS SHIR SAAMILEY, Warshadda Saabuunta Qubeyska iyo Mariska. » 305

## SHARCI

SHARCI Lambar 12 taariikh 22 Jen. 1981, Kordhin canshuuro horay loogu dhaqmaayay iyo kuwo cusub.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAYA: Oggolaanshaha Galaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

### QODOBKA 1AAD

(Canshuurta baabuurta, rimorkiyada, dhucdhuclayaasha iyo ujuurada bixinta summaddooda)

Qodobbada 7 iyo 8aad ee Sharciga 28 Dishember 1965, lamb. 4, waxaa loo beddelay sida hoos ku kala qoran:

— QODOBKA 7AAD

(Qiyaasta khidmadaha canshuurta la qaadayo)

Khidmadaha canshuurta ee sannadkii looga qaadayo baabuurta iyo rimorkiyada waa kuwa soo socda:

a) Baabuurta dadka lagu qaado, ha ahaadaan kuwadhaqan gaar ahaaneedka ah, ama dadka looga kireeyo:

| | | | |
|---|---|---|---|
| — Baabuurta xooggoodu yahay ilaa | 8 HP | Shs. | 198/= |
| — Baabuurta ka xoog badan | 8 HP ilaa 11 HP | » | 297/= |
| — » » » » | 11 HP » 14 HP | » | 396/= |
| — » » » » | 14 HP » 18 HP | » | 528/= |
| — » » » » | 18 HP » 22 HP | » | 792/= |
| — » » » » | 22 HP » 26HP | » | 1.056/= |
| — » » » » | 26 HP » 30 HP | » | 1.320/= |
| — » » » » | 30 HP » 35 HP | » | 1.650/= |
| — » » » » | 35 HP » wixii ka badan | » | 1.980/= |

b) Baa/ta taksiyada iyo kuwa kale oo la mid ah oo dadka keliya lagu qaado:

| | | | |
|---|---|---|---|
| — Baabuurta xooggoodu yahay ilaa | 8 HP | Shs. | 137,30 |
| — Baabuurta xooggoodu ka badan | 8 HP ilaa 11 HP | » | 205,90 |
| — » » » » | 11 HP » 14 HP | » | 274,55 |
| — » » » » | 14 HP » 18 HP | » | 366,10 |
| — » » » » | 18 HP » 22 HP | » | 549,10 |

| | | | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|---|
| — | » | » | » | » 22 HP | » 26 HP | » | 732,15 |
| — | » | » | » | » 26 HP | » 30 HP | » | 915,20 |
| — | » | » | » | » 30 HP | » 35 HP | » | 1.144,00 |
| — | » | » | » | » 35 HP | wixii ka badan | » | 1.372,80. |

t ) Baabuurta oo shati uleh in ay dadka qaadaan, layn gaar ahna ay ku soc-daan kana shaqeeyaan:

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| — | Baabuurta xooggoodu yahay ilaa | 15 HP | Sh.So. | 228,80 |
| — | Baabuurta ka xoog badan | 15 HP ilaa 20 HP | » » | 286,00 |
| — | » » » » | 20 HP » 30 HP | » » | 343,20 |
| — | » » » » | 30 HP » 40 HP | » » | 457,60 |
| — | » » » » | 40 HP » 50 HP | » » | 572,00 |
| — | » » » » | 50 HP | » » | 858,00 |

j ) Baabuurta iyo rimoorkiyada oo alaab keliya lagu qaado:

| Xoogga | Qiimaha | |
|---|---|---|
| | Baabuurta | Rimoorkiyada |
| | Sh.So. | Sh.So. |
| ilaa 10 Q.li | 136,50 | 109,20 |
| ka badan 10 Q.li ilaa 20 Q.li | 300,30 | 218,40 |
| ka badan 20 Q.li ilaa 30 Q.li | 464,10 | 327,60 |
| ka badan 30 Q.li ilaa 40 Q.li | 617,90 | 436,80 |
| ka badan 40 Q.li ilaa 50 Q.li | 791,70 | 546,00 |
| ka badan 50 Q.li ilaa 60 Q.li | 955,50 | 655,20 |
| ka badan 60 Q.li ilaa 70 Q.li | 1.119,30 | 764,40 |
| ka badan 70 Q.li . . . . . . | 1.365,00 | 955,50. |

## QODOBKA 8AAD

(Khidmadaha joogtada ah)

Khidmadaha joogtada ah oo lagu qiyaasayo canshuurta sannad walba looga qaadayo baabuurta, rimoorkiyada iyo dhucdhuclayaasha, waa kuwa soo socda:

1) Mootooyinka iyo dhucdhuclayaasha ceyn kasta ah oo lagu isticmaalo dhaqan guud ahaaneed ama gaar ahaaneed Sh.So. 99,00

2) Socodka tijaabada, summadda (taarga walba oo xafiiska baabuurtu bixiyo):

a) baabuurta yaryar, basaska, baabuurta waaweyn iyo rimoorkiyada Sh.So. 660,00

b) mootooyinka iyo dhucdhuclaha yaryar oo ceynkasta ah Sh.So. 165,00

t) Baabuurta iyo rimoorkiyada oo shaqo khaas ah lagu qabto, ahna kuwa korkooda booyad, wiish, qalabka kale ee la mid ah Sh.So. 99,00

j) Baabuurta nooca xamuulka ah oo rukhso u qabaan in ay dadka qaadaan (Qod. 1, L. 7(4) Sh.So. 330,00

## QODOBKA 2AAD

(Ujuurrada laysinka wadidda baabuurta, tijaabada baabuurta, rimoorkiyada, cagafyada iyo dhucdhuclayaasha oo ceyn kasta ah)

Qodobbada 1aa diyo 2aad ee Sharciga 27 Jennaayo 1961, lambar 4, iyo beddelaaddii dambe ee lagu sameeyey Sharciga lambar 10 ee 10ka Jennaayo 1978, waxaa haatan loo beddelay sida soo socota:

## QODOBKA 1AAD

(Laysinka wadidda baabuurta)

a) Laysinka wadidda baabuurta ku socot bansiin ama nafto marka u horreysa oo l bixinayo waxaa laga qaadaya . . . . . . . . . . . . Sh.So. 100,0

b) Laysinka wadidda baab,uurta markii lay ku qaadayo bansiin iyo nafto, bixintiisii hc re wax aalaga qaadayaa Sh.So. 200,0

t) Cusbooneysiinta leysinka wadidda baa buurta sannadkii walba waxaa laga qaa dayaa Sh.So. 60,00

## QODOBKA 2AAD

(T i j a a b a d a)

Tijaabada (collaudo) baabuurta, rimoorkiyada, ca gafcagafyada oo shaqada waddooyinka lag uqabtc dhucdhuclayaasha iyo wixii la mid ah, dhammaantood halkii tijaabo ee la sameeyo waxaa laga qaadaya . . . . . . . . . . . . . Sh.So. 100,00.

## QODOBKA 3AAD

(Ujuurrada lagu bixiyo laysinka wadidda dayuuradah iyo ujuurrada dul maridda Dalka)

1) Ujuuradda lagu bixiyo laysinka wadidda da yuuradaha waxaa laga dhigay inta soo socota:

a) Laysinka wadidda dayuuradaha waawey (mar keliya) Sh.So. 500,0

b) Laysinka wadidda dayuuradaha yarya (mar keliya) Sh.So. 400,0

2) Dayuuradaha Dalkeenna dul mara waxaa lag qaadayaa ujuurada soo socota:

a) dayuuradaha nooca JUMBO JET 747, hal kii dayuuro waa Sh.So. 1.720,0

b) dayuuradaha kale halkii dayuuro wa . . . . . . . . . . . Sh.So. 1.500,0

## QODOBKA 4AAD

(Ujuurrada baasaboorrada, dhaafiyayaasha, buugga badmaaxa iyo warqadaha kale ee lagu dhoofo)

1) Qodobka 1aad ee Xeer-sharciga 25 Oktoobar 1960, lambar 9, oo lagu sharciyeeyey Sharci lambar 10 ee 10 Disember 1960 iyo beddelaadii ka dambeysay ee lagu sameeyey Sharciga 10ka Jennaayo 1978, lambar 3, waxaa loo beddelay sida soo socota:

## QODOBKA 1AAD

Ujuurrada bixinta baasaboorrada iyo warqadaha kale oo dibedda loogu dhoofo, waxaa laga dhigay sida hoos ku kala tifaf tiran:

a) Baasaboorrada caadiga ah ee Dalka gudihiisa lagu bixiyo ama lagu cusbooneysiiyo waxaa laga qaadayaa laga bilaabo 30ka Maajo ilaa 31 Disembar 1980 Sh.So. 500,00

b) Baasaboorrada caadiga ah ee Safaaradaha ama ay cusbooneysiinayaan waxaa laga qaadayaa laga bilaabo 30ka Maajo 1980 31 Disembar 1980 Sh.So. 1.000,00

t) Dhaafiyeyaasha iyo warqadaha xuduudka looga gudbo (carta di frontiera) iyo cusbooneysiintooda Sh.So. 100,00

j) Baasaboorrada caadiga ah ee la siiyo ardada dibedda wax kubarata iyo cusbooneysiintooda waa Sh.So. 210,00.

2) Baasaboorrada caadiga ah oo laga bixiyo Dalka gudihiisa ama kuwa ay bixiyaan Safaaradaha ama Qunsuliyadaha Soomaaliya dibedda u jooga iyo cusbooneysiintooda waxaa laga qaadayaa marka laga bilaabo 1da Jennaayo 1980 . . . . . . . . . . . . . Sh.So. 300,00

3) Buugga badmaaxa oo dadka badaha ay ku dhoofaan iyo cusbooneysiintiisa waa Shs. 200.00

QODOBKA 5AAD

(Ujuurada u bixidda Xajka)

1) Qof kasta oo doonaya inuu xajka aado, waxaa laga qaadayaa ujuuro oo dhan Sh.So. 150 (boqol yio konton). Ujuuradaas waxaa lagu bixinayaa tikidka moorka ah ee lagu dhejinaayo baasaboorka ama dhaafiyaha oo lagu dhoofayo.

2) Wax ka beddelka ujuuradaas waxaa lagu soo saarayaa Xeer Wasiirka Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta isagoo dhegeystay Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda.

QODOBKA 6AAD

Qod. 41aad ee Sharciga 27 Juunyo 1966, lambar 9, iyo beddelaaddii ka dambeysay oo lagu sameeyey Sharciga 10 Jennaayo 1978, lambar 3, waxaa haatan loo beddelay sida soo socota:

QODOBKA 41AAD

(Fiisada dadka Ajnabiga ah loo siinaayo inay Dalka joogaan)

Dadka ajnabiga ah oo la siinayo fiisada oo Dalka ku joogaan waxaa laga qaadayaa ujuurada hoos ku kala tilmaaman:

| | | | |
|---|---|---|---|
| a) | Fiisada joogtada ah halkii mar | Sh.So. | 1.500,00 |
| b) | Fiisada dalka lagu joogo ilaa saddex sano halkii mar | Sh.So. | 600,00 |
| t ) | Fiisada Dalka saddex maalmood ilaa saddex bilood halkii mar | Sh.So. | 200,00. |

QODOBKA 7AAD

(Ujuurada faro tirtirka)

Ujuurada fara tirtirka ee uu weydiisto qofka waxaa

## QODOBKA 8AAD

(Ujuurada nikaaxa, furidda iyo mucaamilka)

Ujuurada nikaaxa, furidda iyo mucaamilka oo Max-:amadda ay qaadaan, kuna kala xusan Xeerka 19 Noo-'ember 1943, lambar 189, iyo beddelaadyadii ka dambee-·ey oo lagu sameeyey Xeer-sharciga (Dekreto legisla-.ivo) 23 Maarso 1956, waxaa loo habeeyey sida soo ·ocota:

| | | | |
|---|---|---|---|
| 1. | Nikaaxa | Sh.So. | 50 |
| 2. | Furidda | Sh.So. | 200. |
| 3. | qoraallada ku saabsan: | | |
| | a) Wakaalad | Sh.So. | 50 |
| | b) beeca | Sh.So. | 5% |
| | t) rahanka | Sh.So. | 5% |
| | j) sugnaanta | Sh.So. | 30=/ |
| | x) caddeynta | Sh.So. | 10=/ |

## QODOBKA 9AAD

(B a a b i ' i n)

Sharci ama Xeer kasta oo ka soo horjeeda Sharci-;an ama aan la socon karin waa la baabi'iyay.

## QODOBKA 10ADD

(D h a q a n g a l)

1) Haddii si ka duwan Sharcigan loogu tilmaamin, :anshuuraha Sharcigani ka hadlaayo waxay dhaqan ;elayaan marka laga billaabo 30ka Maajo 1980.

2) Sharcigan wuxuu ka mid noqonayaa Sharciya-·la iyo Xeerarka Dalka, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga a hee Jahuuriyadda.

Muqdisho, 22.1.1981

MADAXWEYNAHA JDS

SHARCI Lambar 13 taariikh 22 Jennaayo 1980

Oggolaansho heshiis guud ee Iskaashiga Dhaqaalaha, Farsamada iyo Ganacsiga ee dhexmaray Dalaka Xubnaha ka ah Ururka Islaamka.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

QODOBKA 1AAD

1) Waxaa la oggolaaday Heshiis Guud ee Iskaashiga Dhaqaalaha, Farsamada iyo Ganacsiga ee dhexmaray Dalalka Xubnaha ka ah Ururka Islaamka.

2) Heshiiskaas waxaa lagu oggolaaday Shirkii 8aad ee Wasiirrada Arrimaha Dibadda ee Dalalka Ururka Islaamka 16 ilaa 22 Maajo 1977, oo lagu qabtay Magaalada Lahoore ee Dalka Bakistaan.

3) Heshiiskaa wuxuu ka mid noqonayaa Sharcigan isagoo lifaaq u ah.

QODOBKA 2AAD

Shuruudaha iyo xaaladaha ay qorayaan qodobbada Heshiiska ku tilmaaman Qod. 1aad ee Sharcigan, waxay leeyihiin qiimo iyo astaan sharci la heer ah Sharciyada iyo Xeerarka Dalka, dhaqangelintoodana waxaa la waafajinayaa Qoqobka 72(1) ee Dastuurka J.D.S. iyo qodobbada uu ka saameeyo Heshiiskan.

QODOBKA 3AAD

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya waxaa awood loo siiyey in uu meelmariyo Heshiiska Sharcigan ku tilmaaman sida uu qabo Qod.82aad ee Dastuurka JDS.

QODOBKA 4AAD

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jahuuriyadda.

Muqdisho, 22.1.1981

MADAXWEYNAHA JDS

SHARCI L. 13 ee 22 Jen. 1981, Meelmarin Heshiis:

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY : Qod. 67aad xubintiisa 5aad, Qod. 82aad xubintiisa 4aad iyo Qod. 72aad xubintiisa 1daa ee Dastuurka JDS.

ISAGOO ARKAY : Heshiiska Guud ee Iskaashiga Dhaqaalaha, Farsamada iyo Ganacsiga ee ka dhexeeya Dalaka xubnaha ka ah Ururka Islaamka, laguna oggolaaday shirkii 8aad ee Islaamka ee Wasiirrada Arrimaha Dibedda ee Dalaka xubnaha ka ah Ururka Islcmka laguna qabtay Tripoli, Libya, 27kii Jumaadal Awel 3dii Jumaada Taani, 1397 H(17-22 Maajo 1977).

ISAGOO TIXGELINAAYA : Oggolaanshaha Golaha Shacbiga Qaranka ee Heshiiska aan soo sheegnay taariikhdiisuna ahayd 21kii Rabiic Al Awal 1401 H( 17ka Janaayo, 1981).

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

QODOGKA 1AAD

Heshiiska Guud ee Iskaashiga Dhaqaalaha, Farsamada iyo Ganacsiga ee ka dhexeeya Dalaka xubnaha ka ah Ururka Islaamka laguna oggolaaday shirkii 8aad ee Islaamka ee Wasiirrada Arrimaha Dibedda ee Dalaka xubnaha ka ah Ururka Islaamka laguna qabtay Tripoli, Libya, 27 Jumaada Awal ilaa 3dii Jumaada Al Taani, 1397 H(17-22 Maajo, 1977).

QODOBKA 2AAD

Heshiiskanu wuxuu ku yeelan doonaa Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya astaan sharci ah, wuxuuna dhaqan geli doonaa markuu saxeexo Madaxweynaha JDS.

Xeerkani waxaa lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 12kii Rabiica Al Awel 1401 H
(17ka Janaayo, 1981)

MADAXWEYNAHA JDS

LAW No. 13 22th Jen. 1981, Instrument of Ratification:

— THE PRESIDENT —

— THE PRESIDENT —

HAVING SEEN : Article 67 para 5,Article 82 para 4 and Article 72 para 1 of the Constitution the Somali Democratic Republic;

HAVING SEEN : The General agreement for Economie Technical and Commercial Co-operation among Member States of the Islamic Conferenc, of the Eighth Islamic Conference of Foreign Ministeres held at Tripoli, Libya, from 27 Jumada Awal 3 Jumada Al Thani, 1397 H ( 17-22 May 1977);

TAKING NOTE : Of the approval of the People's Assmbly of the said Agreement dated 12 Rabic Al-Awal 1401(17th January, 1981).

HEREBY PROMULGETES

The following Decrec:

ARTICLE I

The General Agreement for Economic, Technical and Commercial Co-operation among Member States of the Islamic Conference of foreign Ministers heid in Tripoli, Libya, from 27 Jumada Awal 3 Jumada Al Thani, 1397 H(17-22 May 1977), IS HEREBY RATIFIED.

ARTICLE II

This Agreement shaal have the force of Law in the territory of the Somali Democratic Republic, and shaal enter into force upon signature by the President of the Somali Democratic Republic.

This Decree shaal be published in the Official Bulletin of the State.

Mogadishu, 12 Rabic Al Awal 1401

(17th January 1981).

PRESIDENTE OF THE SDR

(Major General Mohamed Siad Barre)

SHARCI L. 14 taariikh 22 Jen. 1981, : Urogid Sharci

Xeerka Sharci lambar 35 ee 13ka Disemer 1980, kuna saabsan dib u habeynta sicirka sonkorta.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA : Oggolaanshaha Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

QODOBKA 1AAD

Waxaa loo rogay Sharci, Xeerka-sharci lambar 35 ee 13.12.1980 «DIB U HABEYNTA SICIRKA SONKORTA», iyadoo la beddelay qaabka dhismaha qiimaha sonkorta sida ku cad shaxda halkan ku lifaaqan, laguna kordhiyay Qod. 1aad ee Xeer-sharciga xubin labaad oo leh sida soo socota:

2) Qaansheegtooyinka iyo lacag guddoonyada sonkorta Sharcigan ka hadlaayo la xiriirta waxay ka deynsan yihiin canshuuraha kala ah: Diiwaangelinta, moorka iyo canshuurta Dawladda Hoose.

QODOBKA 2AAD

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa 1da Jeinnaayo 1981.

Sharcigan waxaa lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 22.1.1981

MADAXWEYNAHA JDS

(Maxamed Siyaad Barre)

Shaxda dhismaha sicirka sonkorta:

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| 1) | Qaybta Warshadda | Sh. | So. | 341,00 |
| 2) | Canshuurta Dawladda Dhexe | » | » | 720,12 |
| 3) | Kharajka Wakaaladda G.U. | » | » | 56,09 |
| 4) | Kharajka Dawladda Hoose | » | » | 24,49 |
| 5) | Qaybta tafaariikhleyda | » | » | 38,30 |
| | Isugeyn: | Sh. | So. | 1.180,00 |

WASAARADDA HAWLAHA GUU

WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYN.

N A A D O   D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Hodan Axmed Cabdulle ay u soo qoratay arji Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W.H. Guud Xamar maalitii taariikhdu ahayd 24.1.80 ay ku weydiisatay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Yaaq shiid Qaabkiisuna yahay Attangolare Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

| | |
|---|---|
| Waqooyi waxaa ka xiga : | Waddo |
| Koonfur waxaa ka xiga : | Dhul Lamb. 0514 Y |
| Galbeed waxaa ka xiga : | Dhul Lamb. 0513 Y |
| B a r i waxaa ka xiga : | Waddo |

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arkikaraa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahnka iyo Deg.Mag. ee W.H. Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.

Muqdisho, 1.3.1980

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG.MAG.
— Xaaji Maxamed Maye —

L. 144

WASAARADDA HAWLAHA GUU

WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYN.

N A A D O   D H U L

Wax aala caddeynayaa in Jaalle Bashiir Sheekh Cabdisalaam uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W.H. Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 20.3.79 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Madiina Qaabkiisuna yahay Rettangolare Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

| | |
|---|---|
| Waqooyi waxaa ka xiga : | Dhul Lamb. 248 M |
| Koonfur waxaa ka xiga : | Dhul Lamb. 344 M |
| Galbeed waxaa ka xiga : | Dhul Lamb. 347 M |
| B a r i waxaa ka xiga : | Waddo |

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arkikaraa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W.H. Guud Xamar waxaana laga doodi karaa mudo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.

Muqdisho, 1.3.1980

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG.MAG.

— Xaaji Maxamed Maye —

L. 145

WASAARADDA HAWLAHA GUU

WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYN.

N A A D O   D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cabdullaahi Xersi Cusmaan uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W.H. Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 8.11.79 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Madiina Qaabkiisuna yahay Rettangolare Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

| | |
|---|---|
| Waqooyi waxaa ka xiga : | Dhul Lamb. 45 M |
| Koonfur waxaa ka xiga : | Dhul Lamb. 49 M |
| Galbeed waxaa ka xiga : | Waddo |
| B a r i waxaa ka xiga : | Dhul Lamb. 48 M |

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arkikar aaNaqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg.Mag. ee W.H. Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.

Muqdisho, 1.3.1980

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG.MAG.

— Xaaji Maxamed Maye —

L. 146

WASAARADDA HAWLAHA GUU

WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYN.

N A A D O   D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Xuseen Maxamed Aw Cali uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W.H. Guud, Xamar maalintii taariikhdu ahayd 2.10.78 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Yaaq Shiid Qaabkiisuna waa Rettangolare Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 MQ.-

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

| | |
|---|---|
| Waqooyi Waxaa ka xiga: | W a d d o |
| Koonfur Waxaa ka xiga: | Dhul Lamb. 0240 Y |
| Galbeed Waxaa ka xiga: | Dhul Lamb. 0243 Y |
| B a r i Waxaa ka xiga: | Dhul Lamb. 0239 Y. |

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. W. H. Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) Sodon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Bugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.-

MUQDISHO 1 MAR. 1980

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG.MAG.

— Xaaji Maxamed Maye —

L. 147

WASAARADDA HAWLAHA GUU

WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYN.

N A A D O   D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamed Jaamac Yuusuf uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 30.5.79 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Yaaq Shiid Qaabkiisuna waa Rettangolare Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 MQ.-

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

| | |
|---|---|
| Waqooyi Waxaa ka xiga: | Dhul Lamb. 0114 Y |
| Koonfur Waxaa ka xiga: | W a d d o |
| Galbeed Waxaa ka xiga: | Dhul Lamb.0111 Y |
| B a r i Waxaa ka xiga: | W a d d o |

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. W. H. Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) Sodon maamood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Bugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.-

MUQDISHO 1 MAR. 1980

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG.MAG.

— Xaaji Maxamed Maye —

L. 148

## WASAARADDA HAWLAHA GUU

## WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYN.

## N A A D O  D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Yuusuf Cabdi Xersi uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Deg.Mag. ee W.H. Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 20.11.79 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Madiina Qaabkiisuna yahay Rettangolar Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga : Dhul Lmab. 63 M

Koonfur waxaa ka xiga : Dhul Lamb. 66 M

Galbeed waxaa ka xiga : Waddo

B a r i waxaa ka xiga : Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arkikaraa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg.Mag. ee W.H. Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.

MUQDISHO 1 MAR. 1980

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG.MAG.

— Xaaji Maxamed Maye —

L.149

WASAARADDA HAWLAHA GUU

WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYN.

N A A D O  D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Xasan Maxamed Nuur uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W.H. Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 10.2.80 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Yaaq shiid Qaabkiisuna yahay Rettangolar Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

| | |
|---|---|
| Waqooyi waxaa ka xiga : | Waddo |
| Koonfur waxaa ka xiga : | Dhul Lamb. 159 By. |
| Galbeed waxaa ka xiga : | Dhul Lamb. 160 By |
| B a r i waxaa ka xiga : | Waddo |

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arkikaraa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg.Mag. ee W.H. Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.

MUQDISHO 1 MAR. 1980

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG.MAG.

— Xaaji Maxamed Maye —

L. 150

WASAARADDA HAWLAHA GUU

WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYN.

N A A D O  D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamuud Cabdi Xasan uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W.H. Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 8.11.79 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Madiina Qaabkiisuna yahay Rettangolar Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga : Waddo

Koonfur waxaa ka xiga : Dhul Lamb. 38 M

Galbeed waxaa ka xiga : Waddo

B a r i waxaa ka xiga : Dhul Lamb. 37 M

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arkikaraa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W.H. Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.

MUQDISHO 1 MAR. 1980

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG.MAG.

— Xaaji Maxamed Maye —

L. 151

WASAARADDA HAWLAHA GUU

WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYN.

N A A D O   D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamed Xasan Maxamed uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W.H. Guud Xamar maalintii raariikhdu ahayd 10.2.80 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Yaaq shiid Qaabkiisuna yahay Rettangolar Addiihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga : Waddo

Koonfur waxaa ka xiga : Dhul Lamb. 158 By.

Galbeed wax aaka xiga : Waddo

B a r i waxaa ka xiga : Dhul Lamb. 161 By.

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arkikaraa Naqshadda dhulka ootaal Waaxda Sahanka iyo Deg.Mag. ee W.H. Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.

MUQDISHO 1 MAR. 1980

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG.MAG.

— Xaaji Maxamed Maye —

L. 152

WASAARADDA HAWLAHA GUU

WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYN.

N A A D O  D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Yaasiin Cabdi Cali uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Deg Mag. ee W.H. Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 8.11.79 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Yaaq shiid Qaabkiisuna yahay Rettangolare Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga : Dhul Lamb. 31 Y

Koonfur waxaa ka xiga : Dhul Lamb. 35 Y

Galbeed waxaa ka xiga Dhul Lamb. 32 Y

B a r i waxaa ka xiga : Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arkikaraa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg.Mag. ee W.H. Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.

MUQDISHO 1 MAR. 1980

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG.MAG.

— Xaaji Maxamed Maye —

L. 153

WASAARADDA HAWLAHA GUU

WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYN.

N A A D O   D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Culuma Muuse Aadan ay u soo qoratay arji Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W.H. Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 8.11.79 ay ku weydiisatay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Madiina Qaabkiisuna yahay Rettangolare Addimihiisuna yihii 30X20 kuna fadhiya 600 MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

| | |
|---|---|
| Waqooyi wax aaka xiga : | Dhul Lamb. 32 M |
| Koonfur waxaa ka xiga : | Waddo |
| Galbeed waxaa ka xiga : | Waddo |
| B a r i waxaa ka xiga : | Dhul Lamb. 35 M |

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arkikaraa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg.Mag. ee W.H. Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.

MUQDISHO 1 MAR. 1980

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG.MAG.

— Xaaji Maxamed Maye —

L. 154

WASAARADDA HAWLAHA GUU

WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYN.

N A A D O  D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamed Cabdi Xersi uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W.H. Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 8.11.79 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Madiina Qaabkiisuna yahay Rettangolare Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

| | |
|---|---|
| Waqooyi waxaa ka xiga : | Dhul Lamb. 46 M |
| Koonfur waxaa ka xiga : | Dhul Lamb. 50 M |
| Galbeed waxaa ka xiga : | Dhul Lamb. 47 M |
| B a r i waxaa ka xiga : | Waddo |

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arkikaraa Naqshadda dhulka ootaal Waaxda Sahanka iyo Deg.Mag. ee W.H. Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu s ooqoray Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.

MUQDISHO 1 MAR. 1980

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG.MAG.

— Xaaji Maxamed Maye —

L. 155

WASAARADDA HAWLAHA GUU

VAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYN.

N A A D O  D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cismaan Aadan Maxamed uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Deg.Mag. ee W.H. Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 8.11.79 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Madiina Qaabkiisuna yahay Rettangolare Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga : Dhul Lamb. 46 M

Koonfur waxaa ka xiga : Dhul Lamb. 48 M

Galbeed waxaa ka xiga : Dhul Lamb. 47 M

B a r i waxaa ka xiga : Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arkikaraa Naqshadda dhulka ootaal Waaxda Sahanka iyo Deg.Mag. ee W.H. Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.

MUQDISHO 1 MAR. 1980

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG.MAG.

— Xaaji Maxamed Maye —

L. 156

WASAARADDA HAWLAHA GUU

WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYN.

N A A D O  D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Nuura Maxamuud Cumar ay u soo qoratay arji Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W.H. Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 8.11.79 ay ku weydiisatay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Madiina Qaabkiisuna yahay Rettangolare Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga : Dhul Lamb. 33 M

Koonfur waxaa ka xiga : Waddo

Galbeed waxaa ka xiga : Dhul Lamb. 34 M

B a r i waxaa ka xiga : Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arkikaraa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg.Mag. ee W.H. Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu s ooqoray Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.

MUQDISHO 1 MAR. 1980

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG.MAG.
— Xaaji Maxamed Maye —

L. 157

WASAARADDA HAWLAHA GUU

WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYN.

N A A D O  D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Shamis Faarax Jaamac ay u soo qoratay arji Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W.H. Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 5.6.79 ay ku weydiisatay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaa Mluqdisho Degmada Madiina Qaabkiisuna yahay Rettangolare Addimihiisuna yihii 30X20 kuna fadhiya 600 MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

| | |
|---|---|
| Waqooyi waxaa ka xiga : | Dhul Lamb. 18 M |
| Koonfur waxaa ka xiga : | Dhul Lamb. 22 M |
| Galbeed waxaa ka xiga : | Waddo |
| B a r i waxaa ka xiga : | Dhul Lamb. 21 M |

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arkikaraa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg.Mag. ee W.H. Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.

MUQDISHO 1 MAR. 1980

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG.MAG.

— Xaaji Maxamed Maye —

L. 158

WASAARADDA HAWLAHA GUU

WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYN.

N A A D O  D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamed Ibraahim Cabdi (Antonyo) uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Deg.Mag. ee W.H. Guud Xamar maalintii raariikhdu ahayd 28.1.79 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Kaaraan Jidka Bandar Qaasim uu iska beddelay cabbirkii hore Qaabkiisu ahaa Rettangol Addimihiisuna ahaayeen 150X100 kuna fadhiyay 15000 Mdh.

Sababtoo ah qorshaha dhulka oo is beddelay sidaas aawadeed Naadadii hore oo lagu soo diray warqadda lambarkeedu ahaa WHG/3/23/253 ee 14.2.79 kana baxday Xafiiskaan, waxay isu beddeshay sida hoos ku tilmaaman:

Rasmi ahaan dhulka haatan la siinkaro Jaallahaas Qaabkiisu waa Rettangolar Addimihiisuna waa 15X60 kuna fadhiya 900 Mdh.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga : W. Bandar Qaasim

Koonfur waxaa ka xiga : Waddo

Galbeed waxaa ka xiga : Waddo

B a r i waxaa ka xiga : Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arkikaraa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg.Mag. ee W.H. Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.

Muqdisho, 29.3.1980

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG.MAG.
— Xaaji Maxamed Maye —

L. 159

— MAXKAMADDA GOBOLKA SH/DHEXE —

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA G. SH/DHEXE

HADDUU ARKAY : Dacwadda kor ku qoran;

MARKUU ARKAY : Waxay ku saabsan tahay iyo cad-daynta Bankiga;

HADDUU ARKAY : Qod. 69 D.L.9/9/65 N.2 kuna saab-san lumidda Buugga Kaydka Lambarkiisu yahay

1174/5 kuna qoran tahay Sh.So. 799/=

Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta Jowhaı

WUXUU AMRAYAA

In loo cusbooneysiiyo Buugga kor ku qoran Jaalle, Xaawo Axmed Maxamuud markii ay ka soo wareegto 30 maalmood maalinta Dekereetada lagu Sharciyeeyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA

In Buugga cusub ee la sameyn doono gacanta laga saaro Jaalle, Waawo Axmed Maxamuud ama qof Wa-kaalo sharci ah ka sita iyadoo la sugayo muddada 30ka maalmood ah ee aan kor ku soo sheegnay.

Sh/dhexe, 4.1.81

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA G. SH/DHEXE

(Dr. Yuusuf Aadan Faarax)

L. 160

— MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR —

GUDDOMIYAHA MAXKAMADDA G. BANAADIR

HADDUU ARKAY : Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU HUBIYEY : In Buug Keyd dhumay oo lambarkiisu ahaa 15601 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta 1aad kuna qornayd lacag dhan Sh.So. 1294/= uu iska lahaa Cabdullaahi Cabdulqaadir Daahir sida ku cad warqadda lamb. ———— Taariikh 21.1.80 oo Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta 1aad;

HADDUU ARKAY : Qod. 69 sharciga lamb.2 9.9.65,

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (ammortamento) Buug Keyd lamb. 15601 oo ku qoran magaca Cabdullaahi Cabdulqaadir Daahir ayna ku jirto Sh.So. 1294/=.

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka laanta 1aad u beddelo Cabdullaahi Cabdulqaadir Daahir Buugga Keydka ee kor ku tilmaaman una sameyso mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yareyn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu soo daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 21.2.81

Guddoo./ha Maxkamada
Gobolka Banaadir
Cabdullaahi Max'ed Maax

## OGEYSIIS SHIR SAAMILEY

### *WARSHADDA SAABUUNTA BAYL*

Waxaa dhammaan laysugu yeerayaa saamileyda Shariikadda Warshadaha Kiimikada Soomaaliyeed (Bayl) inay ka soo qayb galaan shirka saamileyda caadiga ah oo lagu qaban doono xarunta shariikadda ee Xamar, saacaddu markay tahay 17/= ama shanta galab nimo, bisha Abriile 25keeda 1981, hadduu shirku dhammaan waayana mar labaadka bisha Maajo 2deeda isku saacadda kor ku qoran.

Saamileyda shiriikadda waxaa laga codsanayaa inay shan maalmood ka hor keenaan saamiyaasha ku qoran, saldhigga shriikadda ilaa iyo intii uu shirku ka dhammaado.

### *ARRIMAHA DOODDA*

1) Oggolaadka dheellitirka xisaabaadkii sannadkii 1980ka.

2) Wixii kale ee soo raaca ama door la bido in laga doodo.

GUDDIGA MAAMULKA

## OGEYSIIS SHIR SAAMILEY

## WARSHADDA SAABUUNTA QUBEYSKA IYO MARIS.

Waxaa dhammaan laysagu yeerayaa saamileyda shariikadda warshadda saabuunta Qubeyska iyo Maris-ka inay ka soo qayb galaan shirka saamileyda caadiga ah oo lagu qaban doono xarunta shirkadda ee Xamar, saacaddu markay tahay 17/ama shanta galabnimo, bisha Abriile 29keeda, 1981 hadduu shirku ku dhammaan waayana mar labaadka bisha Maajo 6deeda isku saacadda kor ku qoran.

Saamileyda shariikadda waxaa laga codsanayaa inay shan maalmood ka hor keenaan saamiyaasha ku qoran, saldhigga shariikadda ilaa iyo intii uu shirku ka dhammaado.

*ARRIMAHA DOODDA*

1) Oggolaashada dheellitirka xisaabaadkii sannadkii 1980ka
2) Wixii kale ee soo raaca ama door la bido in laga doodo.

GUDDIGA MAAMULKA